

# Deeqaha Waxbarashada

## TheWashboard.org

TheWashboard.org (<https://thewashboard.org>) waa webseed deeqda waxbarashada kuleejka oo bilaash ah. Ishaan tayada saraysa ee lagu kalsoon yahay ayaa ku xiraysa ardayda adeeg bixiyaasha deeqda waxbarashada ee Gobalka Washington.

- Waxay fududaynasaa hanaanka codsiga deeqda waxbarashada ee ardayda.
- Xogta gaarka ah ee ardayda waxaa lagu hayaa qaab sir ah.
- Liisaska deeqaha waxbarashada ayaa kala duwan waxayna taageeraan dookhyada kaladuwan ee ardayda iyo guulahooda.
- Sulus kamid ah deeqaha waxbarashada ee lasoo dhajiyayo ayaa qasab ka dhigaaya GPA dhan 3.0 ama ka badan.
- Deeqo badan ayaa la cusboonaysiin karaa, taasoo ka dhigan inaad u qalmi karto maal gelinta deeq waxbarasho oo joogto ah.

## Mythbusters

**Quraafaad: waalidiintayda ayaa sameeya lacag aad u bahan ilaa aanan awoodi karin inaan u qalmo deeqda dhaqaalaha.**

**Xaqiiqada:** Washington College Grant waxay siisaa lacag badan arday badan si ay u helaan noocyo badan oo waxbarasho ah. Xataa haddii aadan u qalmin hadda kahor, waad u qalmi kartaa hadda!

**Quraafaad: Ma codsan karo deeq dhaqaale waayo ma aqaano waxaan samayn doono kadib dugsiga sare.**

**Xaqiiqada:** Waxaad buuxin kartaa codsiyada FAFSA ama WASFA kahor intaadan soo gudbin codsiyada farsamada ee kuleejka ama dugsiga. Waxaad u baahan doontaa inaad ku qorto codsiyada ugu yaraan hal dugsi laakiin waad ku dari kartaa dugsi kasta ood jeclaan lahayd.

**Quraafaad: deeqda dhaqaaluhu waxay keliya bixisaa lacagta jaamacadaha. Kuwaasoo la dhigto afar sano— waxaan u baahan nahay inaan hadda shaqo bilaabo.**

**Xaqiiqada:** Waxaad u adeegsan kartaa deeqda waxbarashada noocyada badan ee waxbarashada, ayna ku jiraan xarumaha xirfada iyo farsamada gacanta, kuleejyada bulshada, tababarada shaqada qaarkood, iyo, haa, jaamacadaha sidoo kale. Waxaad haysataa dookhyo!

**Quraafaad: Keliya orodyahannada caanka ah iyo ardayda hela buundooyinka wanaagsan ayaa heli kara deeqaha waxbarashada.**

**Xaqiiqada:** Buundooyinka wanaagsan iyo ciyaar yahannada ayaa ka caawin kara ardayda inay galaan dugsiyada qaar, laakiin inta badan barnaamijyada caawimaada ardaydu ma eegaan buundooyinka ardayga ama awoodihiisa ciyaarta.

**Quraafaad: helitaanka deeq dhaqaale ayaa ah wax dhib badan, mana jirto meel aan ka helaayo cawimaad.**

**Xaqiiqada:** Dugsiyada gobalka ku yaala ayaa qabta munaasabadaha deeqda dhaqaalaha halkaasoo ardaydu ay ka heli karaan caawimaad bilaash ah oo ku aadan buuxinta codsiyada. La taliyahaaga ayaa kaa caawin kara helitaanka munaasabad kuu dhow.

## Baraha Raadinta iyo Kaydadka ee Deeqaha Waxbarashada

- ✓ <https://gearup.wa.gov/educators/scholarships>
- ✓ <http://getschooled.com/journey/get-to-college/scholarships-for-college>
- ✓ <https://www.scholarshipjunkies.org>
- ✓ <http://bigfuture.collegeboard.org/scholarship-search>
- ✓ [www.unigo.com](http://www.unigo.com)
- ✓ <https://scholarships360.org/>
- ✓ <https://www.fastweb.com/>
- ✓ [www.scholarships.com](http://www.scholarships.com)



## Maxaa xigga?

**Kahor intaadan codsan caawimaad dhaqaale, waa inaad codsataa diiwaan gelinta dugsiyada ama barnaamijyada aad doonayso.**

## Talabooyinka Muhiimka u ah Ardayda Fasallada ugu danbeeya ee Dugsiga sare ku jira

1. Codso diiwaan gelin.
2. Codso deeqda dhaqaalaha.
3. Akhri waraaqaha go'aanka dugsiga oo isbarbar dhig ku samee waraaqaha aqbalaada deeqda dhaqaalaha.
4. Gaar go'aan, u sheeg dugsiyada.
5. Qalin jabi.
6. Isdiiwaan gelin oo ka qaybgal Tababarka.

Bugga Shaqada Ardayga ee Ololaha Sannadka 12aad wuxuu kugu hagi karaa gelitaanka kulliyadda iyo hannaanka gargaarka maaliyadeed. Ka raadi aalado badan at <https://gearup.wa.gov/students/apply-to-college>

## Ilaha

### Qorshayso Mustaqbalkaaga

Ardayda dugsiga sare ayaa baran kara xirfadaha, iyo hanaanka diiwaan gelinta xogna ka helaaya caawimaada dhaqaalaha. Booqo <https://wsac.wa.gov/actionplan>

### Ku qiyaas deeqda aad helayso Aalada Xisaabta ee Deeqda Dhaqaalaha

Adeegso aalada xisaabta ee deeqda dhaqaalaha si aad u qiyaasto deeqda dhaqaale ee aad heli karto. Booqo <https://portal.wsac.wa.gov/a/aid-calculator>

### Fahanka Lingo

Baro waxa looga jeedo kuwaan. Liisnaan Aqoonta Kuleejka ayaa lagu heli karaa Af Ingiriis, Ruush, Soomaali, Isbaanish, iyo Fiyeednaamiis ah. Booqo <http://www.wcan.org/college-knowledge>

### La xariir Otterbot

Hi Otter

Otterbot waa adeegga fariin qoraalka bilaashka ah si uu uga caawiyo ardayda Washington inaybadeegsadaan deeqda dhaqaalaha iyo waxbarashada kuleejka iyo shaqada. Ardayda ayaa adeegsan kara Otterbot ayagoo isticmaalaaya fariin qoraalka 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii. Fariin qoraal ugu dir jumlada “Hi Otter” lambarka 360-928-7281. LeaXog badan ka eeg <https://wsac.wa.gov/otterbot>

## [www.gearup.wa.gov](http://www.gearup.wa.gov)

Xogta ku qoran daabacaadaan ayaa lagu diyaarshay deeq laga helay Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka. Hase yeeshee, xogtu qasab maaha inay wakiil ka tahay xeerka Waaxda Waxbarashada, waana inaad u qaadan inay tahay dhiiri gelin ka timid Dawlada Federaalka ah.



1

# Caawimaada Dhaqaalaha 101

Sida lagu helo Mal gelinta Waxbarashada Dugsiga Sare Kadib

# Marinnada Dugsiga Sare Kadib: Waxaad haysataa dookhyo!

Maxaan uga jeednaa marka aan adeegsano erayga kuleej? Waxaan uga jeednaa nooc kasta oo waxbarasho ama tababar ah ood gasho dugsiga sare kadib.

Waxaa jira dookhyo badan oo ay helayaan ardaydu dugsiga sare kadib ayna ku jiraan *tababarada shaqada, militariga, barnaamijyada tababarka shaqada, shahaadooyinka kuleejka bulshada, shahaadooyinka 2 sano, iyo shahaadooyinka digriiga 4 sano ah*. Erayga kuleej waxaa ku jira dhammaan waxyaabahaan.

## Waxbarashada iyo Tababarka Dugsiga Sare kadib Waa mid Qiimo jaban!



Washington ayaa baxsha deeqda dhaqaalaha gobalka oo laga heli karo wadanka.

Qarashku waa inuusan caqabad ku noqon helitaanka waxbarashada dugsiga sare kadib.

Waxaa jirta lacag u diyaarsan si looga dhigo higsiga mid qiimo jaban.

**Wax ka badan 80% ardayda kuleejka oo dhan ayaa hela caawimaad dhaqaale si looga caawiyo bixinta kuleejkooda.**

## CAAWIMAADA DHAQAALAHA

Caawimaada dhaqaaluhu waa lacag kaa caawinaysa dhiibista qarashka kuleejka ama dugsiyada xirfada. **Lacagtaan waxay ka timaadaa dawlada gobalka iyo federaalka, kuleejyada iyo jaamacadaha, bangida, iyo ururada.** Waxaa kamid ah **deeqaha, deymaha, shaqada waxbarashada, iyo deeqaha waxbarashada. Si aad u hesho caawimaad, waa qasab inaad codsataa.**

Codsashada deeqda dhaqaalaha ayaa ah hanaan ka duwan codsashada diiwaan gelinnada dugsi ama barnaamij. Waa inaad samaysaa labada talaababa. Waa inaad codsataa Deeqda dhaqaalaha adoo adeegsanaaya FAFSA (Free Application for Federal Student Aid, Codsiga Bilaashka ah ee Caafimaadka rdayda ee Federaalka ah) ood ka helayso <https://studentaid.ed.gov/sa/fafsa>. Haddii aadan ahayn muwaadin aadana awoodin inaad codsato FAFSA sabab la xariirta aqoonsigaaga soo galootiga, waxaad buuxin kartaa codsiga WASFA ( Washington Application for State Financial Aid, Codsiga Washington ee Deeqda Dhaqaalaha Ardayda ee Gobalka) ood ka helayso <https://wsac.wa.gov/wasfa>

Kuleejyada ayaa adeegsanaaya natiijoyinka FAFSA ama WASFA si ay u abuuraan xirmadaada deeqda waxbarashada sanad kasta. FAFSA iyo WASFA ayaa oonleen lagu heli karaa Oktoobar 1 deeda sanad kasta. Qorshayso inaad buuxiso FAFSA ama WASFA xili hore sida Oktoobar 1 intaad ku jirto sanadka ugu danbeeya ee dugsigaaga sare iyo sanad kasta oo kale ood kuleejka ku jirto. Lacagta deeqda dhaqaaluhu wa amid kooban, kuleejyada ayaana badanaa deeqda ku baxsha hadba sida loosoo kal horeeyo.

## DEEQDA ARDAYDA EE FEDERAALKA

Waxaa Waxbarashada ee Maraykanka (US Department of Education) ayaa bixisa noocyada badan ee deeqaha federaalka, deymaha ardayda, iyo fursadaha kale ee deeqda waxbarashada oo la siiyo ardayda dhigata kuleejyada bulshada iyo kuwa farsamada, kuleejyada afarta sano ah iyo jaamacadaha, iyo dugsiyada tababarka shaqada.

## CAAWIMAADA DHAQAALAHA EE GOBALKA WASHINGTON

Marka lagu daro deeqda dhaqaalaha federaalka, Gobalka Washington ayaa baxsha sadaqoyin, deeqaha waxbarashada, iyo barnaamijyada daynta.

**Washington College Grant** ayaa ah barnaamijyada deeqda dhaqaalaha ee ugu deeqsigan Wadanka. Dadka dhammaan da'aha ee kasoo jeeda qoysaska danyarta ah ilaa kuwa dabaqada dhexe ayaa u qalmi kara inay helaan lacagta kuleejka, tababarka shaqada, iyo ka qaybgalka barashada shaqada. Maal gelinta ayaa loo balan qaadayaa ardayda u qalma. Arday u qalma deeqda oo a socda qoys afar qof ah oo sameeya dakhli dhan \$56,000 ama ka yar sanadkii ayaa helaaya deeqda dhaqaalaha oo dhamaystiran. Qayb kamid ah deeqaha ayay helayaan qoysaska sameeya dakhliga dhaqan celceliska heerka gobalka ee dakhliga qoyska, oo dhan \$102,000 sanad kasta.

**CBS, Deeqaha Damaanada Kuleejka** waa deeq lagu daboolayo lacagta heerka kuleejyada dawlada, qarashaadka qaar, iyo gunnada koban ee buugaagta laguna baxsho deeqda dhaqaalaha gobalka ee ardayda buuxsha shuruudaha barnaamijka balan qaadka. Ardayda u qalanta ee jooga Washington ayaa si ootomaatig ah looga diiwaan gelinayaa dugsi dhexe.

Ardayda ayaa ka qaybgeli kara 65 jaamacadood, kuleej, iyo dugsiyada farsamada ka kooban. Si aad u hesho College Bound Scholarship, Ardaydu waa inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:

- Waa inay buuxshaan shuruudaha balan qaadka deeqda waxbarashada ayna buuxshaan shuruudaha daganaanshaha ee gobalka.
- Waa inay buuxshaan codsiga deeqda dhaqaalaha sanadkooda ugu danbeeyay ee dugsiga sare iyo sanad kasta oo ay ku jiraan kuleejka si loo go'aansho inay dakhli ahaan u qalmaan.
- Waa in laga aqbalaa ayna dhigtaan kuleejka ay u qalmaan.
- Waa inay guul ka gaaraan kuleejkooda. Tan ayaa noqon karta GPA (Grade Point Average, Celceliska Buundada Imtaxaanka) ama anshaxa wanaagsan ee ardayga waana wax gaar ah dugsi kasta.

## DAYMAHA

Waxaa lagu siin karaa dookhyada deynta oo qayb ka ah caawimaada dhaqaalaha ee dugsiga ama barnaamijka aad dhiganayso. Deynta ardaydu waa lacagta aad u daysato waxbarashadaada, aadna bixiso muddo kadib. Si ka duwan deeqaha ama mushaaraka shaqada waxbarashada waa qasab inaad celiso lacagta aad daysato. Qasab maaha inaad aqbasho wax kamid ah ama dhammaan daymaha lagu yabooho. **Wixii xog dheeraad ah iyo ilaha deynta ardayda ka eeg barteena u doodista deynta ardayda oo ah <https://wsac.wa.gov/loan-advocacy> iyo <https://www.studentloaned.wa.gov/>**

## NOOCYADA DEEQDA



### Deeqaha

Dawlada gobalka iyo federaalka ayaa badanaa siiya deeqda ardayda qaba baahiyaha ugu badan ee dhaqaalaha. Lagaama doonaayo inaad soo celiso lacagahaan haddii aad si buuxda u dhamayso koorsooyinkaaga. Tusaale, Deeqda Pell waa deeq federaal oo la siiyo ardayda baahan.



### Deeqaha Waxbarashada

Ururada iyo dugsiyada ayaa deeqahaan ku baxsha buundooyinka sareeya, asalka dhaqanka ama diinta ardayga, ciyaaraha, iyo hibooyinka gaarka ah ee ardayga. Lagaama doonaayo inaad soo celiso lacagahaan haddii aad si buuxda u dhamayso koorsooyinkaaga.



### Barashada Shaqada

Waxay kaa caawinaysaa inaad lacag hesho si aad ugu dhiibto waxbarashadaada adoo shaqaynaaya nus kamid ah waqtiga shaqo uu ku siinaayo kuleejku. Waa jiraa barnaamijyada barashada shaqada ee federaalka, gobalka, iyo jaamacada.



### Daymaha

Deymaha ardayda waxaa baxsha bangida, kuleejyada, iyo xarumaha kale inta badanna waa kuwo dulsartoodu yar tahay marka loo eego daymaha kale. Si ka duwan caawimaadaha am deeqaha waxbarashada, deymaha waa qasab in dib loo baxsho ayagoo wata dulaar, xataa haddii aadan qalin jabin.



## Waa maxay Ballan qaadka CBS?

- Waa in ardaygu ka qalin jabiyo dugsi sare oo ku yaala Gobalka Washington ama barnaamijka waxbarashada guriga oo la aqoonsan yahay uuna keenaa celceliska 2.0 GPA ama ka badan.
- Waa inuusan gelin wax danbi ah.
- Waa inuu codsadaa deeqda dhaqaalaha asagoo buuxinaaya codsiga FAFSA ama WASFA bilooxiga sanadkiisa ugu danbeeyay dugsiga sare.

# Ma qabtaa Xaalado Gaar ah?

Haddii aad tahay qof bilaa sharci ah, aan ahayn muwaadin, ilmo hooy la'aan ah oon waalid la socon, aad soo martay ama ku jirto daryeelka dawlada, aad tahay qaniis LGBTQ+ (lesbian, gay, bisexual, or transgender, Qaniisiinta raga, dumarka, labo galmoodka, nimoov naaga), iyo/ama aad qabto xaalado kale oo gaar ah, fadlan booqo <https://gearup.wa.gov/students/pay-for-college> si aad u hesho xog ku saabsan u qalmida kuleejka iyo barnaamijyada taageeraaya higsigaaga aadna u ogaato sida aad ku helayso deeqda dhaqaalaha ee ugu fiican.

## ARDAYDA AAN HAYSAN SHARCI IYO KUWA KALE EE AAN AHAYN MUWAADINIINTA

### LACAGTA QOFKA DAGAN GOBALKA

Waa qasab inaad tahay qof dagan Washington si aad u dhiibto lacagta kuleejka ee gobalka dhexdiisa ama aad u hesho deeqda dhaqaalaha ee gobalka. Labadaba Muwaadiniinta Maraykanka iyo kuwan aan ahayn Maraykanka ayaa noqon kara dad dagan Washington, ayna ku jiraan ardayda aan haysan sharciiga muwaadinimada. Inta badan, qof ayaa ah qof deegaan ah Washington haddii uu ku noolaa gobalka hal sano kahor intuuusan bilaabin kuleejkiisa ama barnaamijkiisa. Laakiin waxaa jira qaabab kale oo lagu noqdo muwaadin.

## CAAWIMAADA DHAQAALAHA EE GOBALKA

Ardayda aan haysan sharciiga iyo kuwa aan wadanka u dhalan ee buuxsha shuruudaha lacagta kuleejka ardayda gobalka ayaa u qalmi kara barnaamijyada deeqda dhaqaalaha ee gobalka Washington, xataa haddii aysan u qalmin deeqda dhaqaalaha ee federaalka sabab la xariirta aqoonsigooda soo galootiga. Waa qasab inaad buuxisaa shuruudaha gaarka ah ee barnaamijka iyo dakhliga, oo dheeraad ah ku ah kuwa daganaanshaha, ee barnaamijyada Washington College Grant, the College Bound Scholarship, State Work Study, iyo Passport to Careers.

## SIDA LOO CODSADO

WASFA, Codsiga Washington ee Deeqda Dhaqaalaha Gobalka waxaa qaata dadka aad buuxin codsiga federaalka ee FAFSA . Dadka buuxsha codsiga WASFA ayaa codsanaaya deeqda gobalka. Waxaa jira sababo badan oo loo codsado WASFA badalka FAFSA, ayna ku jiraan haddii aad tahay qof aan haysan sharci ama aan u dhalan wadanka ama aysan waalidkaa ama xubnaha qoyskaaga haysan sharci aysana doonayn inay buuxshaan FAFSA. Haddii aadan hubin nooca codsiga aad buuxinayso, adeegso foomka su'aalaha ee WASFA si aad u ogaato adoo booqanaaya <https://wsac.wa.gov/wasfa>

## CARRURTA KU JIRA DARYEELKA DAWLADA

Haddii aad ku jirtay daryeelka dawlada markaad jirtay 13 kadib, lacag iyo khayrad ayaa la heli karaa si lagaaga caawiyo inaad sii wadato waxbarashadaada - ayna ku jiraan tababarka shaqada, dookhyada kuleejka 2 sano iyo 4 sano ah - ood ka helayso inta badan dugsiyada Gobalka Washington. Waxaa jira barnaamijyo badan oo u diyaar garoowga kuleejka ah iyo barnaamijyada deeqda dhaqaalaha oo gaar ah u ah carruurta dawlada koriso oo adigga laguugu talagalay!

Ka akhri xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada deeqahaan dhaqaalaha, xogahooda, iyo shuruudahooda u qalmida barta:

- <http://independence.wa.gov/>
- <https://gearup.wa.gov/students/pay-for-college>
- <https://gearup.wa.gov/file/fostering-college-knowledge-planning-paying-higher-education-youth-care>



# Hel Caawimaad

Waxaa jira tiro badan oo munasabada Ololaha Fasalka 12aad oo lagu qabto gobalka oo dhan laga bilaabo Oktoobar ilaa Diseembar si looga caawiyo ardayda iyo qoysaska inay codsadaan deeqaha dhaqaalaha.

Booqo <https://wsac.wa.gov/12th-year-campaign> si aad u hesho munasabad aadna u hesho caawimaad qarsoodi ah oo lagaa siiyo buuxinta foomamka codsiga WASFA iyo FAFSA.